

Xeerka Maamul, ee 1^{da} Setembere 1959, lamba. 126 diiw.

U-diyaarinta xirfadeed, ee xagga mihnadda kaaliyenimo.

WASAARADDA CADDAALADDA

WASIIRKA

Markuu arkay Amargooyada 2 Feberaayo 1959, lamba. 5;

Markuu arkay xeerka 18 Maajo 1956, lamba. 78;

Markuu arkay xeerka 12 Oktoobar 1957, lamba. 35;

Markuu Garwaaqsaday baahida loo qabo in lagu dhaqaaqo diyaarin xirfadeed, eek u habboon ka-dhursugeyaasha mihnadda kaaliyenimo laga qabanayo Xafiisyada garsoorka (caddaaladda), ee Soomaaliya:

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1

Muqdisho in lagu qabto, oo hoos imaanayo maamulka guddoomiyaha Maxkamadda Caddaaladda, Kooris u-diyaarin xirfadeed, oo lagu barayayo mihnadda kaaliyenimo.

Kooriska ujeeddadiisu waa in tababartayaasha la siiyo waxbarashada xirfadeed oo lagama maarmaanka u ah xagga waajibaadka kaaliyenimo, ee laga fulinayo xafiisyada kala, ee garsoorka (Caddaaladda), ee Dhulka.

Qod. 2

Waxaa loooggolaanayaa in ay kooriska ka qaybgalaan dhammaan dadka ka codsada Wasaaradda Diinta Caddaaladda , inta lagu jgudajiro 20^{ka} Setember 1959, oo haysta dusiga dhexe ama shahaado u dhiganta.

Waxaa kale oo kooriskaloo oggol yahay, si ka madaxbannaan shuruudaha kor ku xusan:

- a) hawladeennada drejada “B”, ee Maamulka guud;
- b) dadka haaya, xataa sí ku meel gaar ah, xilalka kaaliye ama u-qaybsanayaal ka Xafiisyada Caddaaladda, ee Soomaaliya;
- c) dadka uu, Guiddiga ku xusan Qod. 6aad, u arko in ay u qalmaan, kaddib marka laga qaado imtixaan soo gelitaan, ee xagga aqoonta guud.

Qod. 3

Koorika waxa uu bilaabanayaa 1^{da} Oktoobar 1959, waxa uuna soconayaa afar bilood.

Qod. 4

Ka-qaybgalka (dhigashada) koorista waa lacag láaan.

Qod. 5

Maadooyinka, lagu baranayo kooriska, waa kuwa soo socda:

- 1) qaybo ka mid ah Xeerka Habka Madaniga;
- 2) qaybo ka mid ah Xeerka Habka Ciqaabta;
- 3) adeegyada kaalinta iyo qalabka qoraa);
- 4) qaybo ka mid ah habka Shareecada Islaamka (af carabi lagu bixinayo).

Inta uu koorisku socdo, tababartayaalku waxa ay galaangal u yeelanayaan Xafiisyada kaalinta, ee Dhulka, sí ay sameeyaan tababartayaalka u falgeliyaan waxa ay bartaan.

Qod. 6

Dhammaadka kooriska tababartayaasha waxa ay gelayaan imtixaan uu qaadayo Guddi ka kooban Agaasimaha, oo shir-guddoominaya iyo macallimiin.

Kuwa ku guuleysta dhammaan maadooyinka, waxa ay helayaan shahaado muujineysa in ay u suuban yihiin in lagu qoro mihnadda kaaliyenimo.

Qod. 7

Mgacaabista macalliminta dhigaaya kooriska waxaa sameynaya Wasiirka Diinda iyi Caddaaladda, ayada oo laga ambaqaadayo soo-jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Caddaaladd.

Qod. 8

Muddadaxilhaynta, agaasimaha iyo macallimiinta waxaa lagala mid dhigayaa, xag kasta, asaatidda u-qaybsan, dugsiga diyaarinta “Siyasadda iyo Maamulka”, ee Muqdisho.

Qod. 9

Kharashaadka la xiriira kooriska waxa ay saaran yihiin oo laga bixinataa madaxa 19aad, ee Miisaaniyadda.

Muqdisho, 1da Setember 1959.

Wasiirka

Shekh Maxamuud Maxamed Faarax

Waa arkay waana diwaangeliyey -

Diiw. lamba. 19, Xaashi lamba. 48.

Muqdisho, 19 Setember 1959.

Hanti-dhowraha: **Spadaro**